

si ay u tixgeliyaan Adeegyada Soo-

Su'aalaha lagu soo daray macluumaadkan waxaa loogu talagalay inay bixiyaan bar bilow ah ee wadhadalka kooxda IEP, laakiin kooxaha IEP waa inay si buuxda u sahamiyaan duruufaha ardayga iyagoo tixgelinaya baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyadeed ee COVID-19. Kooxaha IEP waxay tixgelin karaan su'aalaha tusaalaha ah ee hoose ee khuseeya arday kasta. Kooxuhu waxay sii kordhin doonaan su'aalaha gaarka u ah ardayga.

Kooxuhu lagama filaayo inay si buuxda dib ugu eegaan su'aal kasta oo ku jirta liiskan.

SU'AALO LA XIDHIIDHA MACLUUMAADKA LA HELI SI LOO XOGSIIYO GO'AAN-SAMAYNTA KOOXDA

- [Macluumaad](#) intee le'eg ayay hayaan kooxda IEP si ay si buuxda uga fiirsadaan duruufaha ardayga?
- Maxaa kale oo xog ah ayaa loo baahan karaa? Sidee xogtaas loo ururin karaa?
- Xogta la hayo miyay bixisaa sawir buuxa oo ku saabsan awoodaha ardayda? Maxaa kale oo dhameystiri lahaa sawirka?
- Xogta lagu uruuriyo dib u eegista faylka, [kormeerka horumarka](#), warbixinnada horumarka, warbixinta natijada, shaqada fasalka, iyo qiimeynta rasmiga iyo tan aan rasmiga ahayn iyo baaritaanka ayaa muujinaya horumarka ardayga ee himilooyinka sanadlaha ah ee IEP iyo manhajka waxbarashada guud?

SU'AALO U GAAR AH CAAFIMAADKA MASKAXDA, OO AY KA MID YAHAY FAYO-QABKA SHUCUUR BULSHEEDKA & HAB-DHAQANKA

- Ardaygu ma leeyahay xaalad caafimaadka dhimirka ee jirtay iyo/ama baahi shucuur bulsheed ama hab-dhaqan oo la aqoonsaday?
- Intee in le'eg oo naxdin leh, dhacdooyinka nolosha ee xun, iyo/ama culeyska ayuu ardayga soo maray sababo la xiriira COVID-19 ama duruufo kale oo saameyn ku yeeshay awooddooda qaadashada FAPE?
- Maxay yihiin walbahaarka uu sababay isbadalada ku yimid howlaha caadiga ah ama saameynta tooska ah ee COVID-19 ee ardayga iyo/ama kuwa ay jecelyihiin?
- Sidee waalidiinta, daryeelayaashu, iyo bixiyeyaasha kaleba uga jawaabaya arrinta?
- Waa maxay adeegyada bulshada loo baahan yahay ama hadda la bixiyaa?
- Qoysku ma leeyihiin marin ay ku helaan ilo muhiim ah?

SU'AALO LA XIRIIRA TAAGEERAYAASHA WAXBARASHADA EE LOO HELI KARO DHAMMAAN ARDAYDA

- Maxay yihiin adeegyada soo kabashada ee ay heli karaan dhammaan ardayda? Adeegyadaas kee baa ardaygan isku dayey iyo/ama marin u helay? Sidee bay adeegyadaasi ugu shaqeeyeen ardayga? Adeegyadaas kee baa ardaygan isku dayin iyo/ama marin u helin? Ilaa heer intee le'eg ayaa qorshaha guud ee kala-guurka bilowga ah ee dhammaan ardayda uu ugu shaqeeyaa ardayda gaarka ah? Muxuu qorshuhu ugu baahan yahay si loo suu shaqsiyeeyo?
- Miyuu ardaygu helayaa taageerada guud ee waxbarashada ee barashada aan la dhamaayan iyadoo u sabab tahay faafida COVID-19, ama saamaynta ay ku leedahay fayyo-qabka ardayga shucuurtiisa iyo dhaqankiisa ee ay sababtay ka joojinta waxbarashadda fool-ka-foolka ah iyo duruufaha kale ee ku soo noqnoqday isla aafada COVID-19, sida dabka kaymaha, jahwareerka isirka ama caddaalad darrada, daaladhaca dhaqaalaha, iyo walaacyada kale? Waa maxay

Su'aalaha Suurtgalka ah ee Hagaya Kooxaha IEP



si ay u tixgeliyaan Adeegyada Soo-

waafajinta, wax ka beddelka, iyo/ama la qabsiga u baahan doona inay dhacaan si loogu suurogeliyo ardayga inuu helo adeegyadaas?

- Maxay noqon kartaa habka ugu haboon uguna wax ku oolsan ee looga kabto xirfadaha lumay iyo in wax laga qabto dulduleelada ku dhaca aqoonta ardayga ama loo dardar-geliyo horumarka ardayga ee dhinacyada uu ardaygu ka liito ama uusan ugu hormarin sidii la filayay?
- Waa maxay koorsada waxbarasho ee loo baahan yahay si loogu suurtogaliyo soo kabashada guusha ee ilmaha?

si ay u tixgeliyaan Adeegyada Soo-

SU'AALO LA XIDHIIDHA SIINTA WAXBARASHADA GAARKA AH ARDAYGAN

- Ma jiraan adeegyo ku jira IEP-ga ardayga oo aan la siinin ama aanu ardaygu heli karin? Degmadu ma siisay FAPE ardayga inta lagu jiro Xiritaanka Dugsiga Guga 2020 ee la Balaariyay iyo muddada sanad dugsiyeedka 2020-21? IEP si ku habboon ma loo hirgeliyey? Maxay yihiin adeegyada ardaygu helay?
- Muxuu [xogta waxqabadka ardaygu](#) muujiyaa ee ku saabsan waxqabadka ardayga ee akademiyadda iyo ficilaka laga bilaabo Kahor Xiritaanka Dugsiga ee Maarso 2020 ee la Balaarshay iyo ilaa barashada Dhamaystiran ee Onlaynka (Comprehensive Distance Learning (CDL)), Isku-dhafka ah (Hybrid), ama Barashada Goobta ee sanad dugsiyeedka 2020-21?
- Ardaygu miyuu horumar ka gaadhay yoolalka iyo ujeedooyinka waxbarashada shaqsiga ah kahor Xiritaanka Dugsiga Guga 2020 ee la balaariyay iyo muddada sanad dugsiyeedka 2020-21? Maxay ahaayeen cabbiraadaha aasaasiga ah ee ardaygu ujeedooyinkooda iyo himilooyinkooda IEP kahor Xiritaanka Dugsiga Guga 2020 ee la Balaariyay iyo muddada sannad-dugsiyeedka 2020-21? Kooxda IEP ma haysaa dukumiinti ku saabsan horumarka uu ardaygu sameeyay intii lagu jiray Xiritaanka Dugsiga Guga 2020 ee la balaariyay iyo muddada sanad dugsiyeedka 2020-21 oo ah qaab warbixinno horumarineed iyo dukumiintiyo kale?
- Ardaygu miyuu sameeyay horumarka laga filaaayay mid kasta oo ka mid ah himilooyinka sanadlaha ah ee ardayga iyo manhajka waxbarashada guud? Heerka horumarka si weyn ma hoos ayuu ugu dhacay? Haddii heerka horumarka uu hoos u dhacay, xagee kooxda ku qiyaaseysaa in xirfadaha canugga ay gaari lahaayeen hadii qaabka waxbaridda uusan is baddelin?
- Sidee ardayga heerarkiisa akademiyad iyo waxqabad ee hadda ugu barbardhigmaa heerarka waxqabadka ee ardayga ee dhammaan yoolalka sanadlaha ah ee IEP ka hor xiritaanka xarunta dugsiga ee qasabka ah?
- Ilaa heer intee le'eg ayuu ardaygu kala kulmay lumis xagga xirfadaha ah - oo ay ku jiraan xirfadaha tacliimeed, shaqo, ama dabeecadeed — intii dugsiga degmadu ka jawaab celiniyay cudurka faafa ee COVID-19?
- Maxay macallimiinta, bixiyeyaasha adeegyada la xiriira, waalidiinta / dadka ardayda masuulka ka ah, daryeel-bixiyeyaasha iyo xubnaha kale ee qoyska ka arkeen xaadiritaanka ardayga, ka-qaybgalka, u fiirsashada, dhaqanka, horumarka iyo waaya-aragnimada guriga inta lagu gudajiray cudurka faafa ee COVID-19?
- Macluumaad intee le'eg ayaa laga heli karaa sannadihii hore ee dugsiga ee ku saabsanaa awoodda ardaygu u leeyahay inuu dib u soo ceshado xirfadihii lumay ama u sameeyo horumar wax ku ool ah ka dib nasashooyin dheeri ah oo xagga waxbarashada ah, sida fasaxa xagaaga kadib?
- Ardaygu ma u baahday / qaatay wax adeeg ah oo ESY ah inta lagu jiro xagaaga?
- Ardaygu miyuu sameeyey “horumarka ku habboon marka loo eego duruufaha ilmaha” (*Andrew F. v. Douglas County School District Re-1*)? Sidee ayay u dhici sideese ayaysan u dhacayn?
- Ma jiraan baahiyo kale oo u gaar ah ardayga ama ilo kale oo macluumaad ah oo laga fiirsado go'aaminta baahida ardayga ee Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsi ahaaneed ee COVID-19?

TIXGELINTA IEP EE LA XIRIIRA ADEEGYADA SOO KABASHADA SHAKHSIYEED EE COVID-19

- Ardaygu miyuu u baahan yahay taageerooyin dheeri ah iyo / ama adeegyo ku meelgaar ah si uu uga soo kabto waqtiga ardaygu uusan helin ama uusan heli karin adeegyada fog?

Su'aalaha Suurtgalka ah ee Hagaya Kooxaha IEP



si ay u tixgeliyaan Adeegyada Soo-

- Ma tahay heerarka cusub ee xilligan xaadirka ah ee waxqabadka tacliinta iyo Ficilada (PLAAFP) ee loo baahan yahay in la horumariyo si loo sharaxo baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyadeed ee COVID-19?
- Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyeed ee COVID-19 Ma lagu dari doonaa yoolalka iyo ujeeddooyinka sanadlaha ah ee la qiyaasi karo?

si ay u tixgeliyaan Adeegyada Soo-

- Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyeed ee COVID-19 Miyay ka muuqan doonaan waxbarista gaarka ah ee loogu talagalay ardayga? Miyay u baahan tahay inta jeer, muddada iyo kakanaanta in wax laga beddelo?
- Sidee horumarka looga warbixinayaa? Miyaa lagu dari doonaa warbixinta yoolka ama lagu bixin doonaa qaab kale?
- Haddii Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyeed ee COVID-19 ay lagama maarmaan tahay, sidee loogu bixin karaa qaab aan beddelayn Deegaanka Xaddidka Ugu Yar u leh ardayga (LRE)?
- Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyeed ee COVID-19 ayaa dhici doona ka dib maalinta caadiga ah ee dugsiya, mise maalinta iskuulka ma ku jirtaa waqti adeegga la bixin karo iyada oo aan la seegin cashar kale?
- Adeegyada la xiriira ma u baahan doonaan in la kordhiyo ama wax laga beddelo?
- Sidee u yihiin baahiyaha cusub ee laxiriira naafonimada, dib u noqoshada, ama baahida shucuurta bulsheed iyo dabeecadda sababo la xiriira saameynta cudurka faafa ee COVID-19 ee looga hadlay IEP-ga ardayga ee hadda jira? IEP-da sida ay hadda u qoran tahay miyey u taagan tahay barnaamij ku habboon oo hami leh si loogu oggolaado horumarka ilmaha?